

Taageerada Qoysaska Leh Carruurta Yaryar



ama wac
1-888-644-1130

Nidaamka Gubinta ee CradleME

CradleME waxay kaa caawinaysaa inay kugu xirto adeegyada saxda ah ee guriga ku salaysan ee adigga iyo cunugaaga. CradleME waa iskaashi ka dhexeeya barnaamijyo badan.



ama wac
207-287-3991

WIC Nutrition Program (Barnaamijka Nafaqada ee WIC)

WIC waxay u adeegtaa haweenka uurka leh, naas-nuujinaya, iyo carruurta da'doodu tahay ilaa 5 sano jir, oo ay ku jiraan carruurta la xannaaneeyo. WIC waa daryeel nafaqo oo dhammaystiran wuxuuna baxiyaa cuntooyin caafimaad leh, barashada nafaqada, taageerada naas-nuujinta iyo gudbinada loogu talagalay adeegyada kale.



ama wac
1-888-644-1130

Kalkaalinta Caafimaad ee Dadwaynaha

Kalkaalisooyinka Caafimaadka Dadwaynaha ee Maine CDC ayaa baxsha adeegyada Caafimaadka guriga lagu baxsho ee qoysaska. Dhammaan haweenka uurka leh iyo kuwa umusha ah iyo dhammaan ilmaha dhasha iyo dhallaanka da'doodu tahay ilaa 12 billood jir ayaa heli kara booqashada Kalkaalinta Caafimaad ee Dadwaynaha. Haddii aad su'aalo ka qabto caafimaadkaaga ama caafimaadka ilmahaagaa, waxaad codsan kartaa kalkaalinta marka aad rabto adoo wacaaya lambarka CradleME.



ama wac
1-888-644-1130

Maine Mom

MaineMOM ayaa wanaajisa daryeelka haweenka uurka leh iyo kuwa umusha kadib qaata xanuun-baa'bi'iyayaasha xashiishka ka samaysan iyo dhallaankooda iyagoo la midaynaya adeegyada daaweynta isticmaalka mukhaadaraadka ee hooyada. Macluumaadka goobaha adeegga ee MaineMOM iyo sida loo tixraaco adeegyada ayaa laga heli karaa barta MaineMOM.org.

Barnaamijyada Daryeelka Ilmaha (Child Care) iyo Bilowga Hore (Head Start)



Doorashada daryeelka ilmaha ayaa noqon doonta go'aamada ugu muhiimsan ee aad gaarto. Barnaamijyada tayada leh waxay bixiyaan daryeel barbaarin leh iyo taageerada waxbarashada hore, oo gobolka Maine ayaa haya agab ku caawin kara!



Child Care Affordability Program (Barnaamijka Awooddida Daryeelka Ilmaha) wuxuu ka caawiyaa qoysaska u-qalma inay bixiyaan kharashka daryeelka ilmaha si ay waalidiintu u shaqeeyaan, wax u bartaan, ama uga qayb qaataan barnaamijka tababarka shaqo. Kaalmada ayaa sidoo kale waxaa heli kara qoysaska u-qalma kuwaasi dadka waaweyn (qofka weyn) ee hawlgabka noqday ay mas'uulka sharciga ah ka yihiin ilmaha.



Head Start (Bilowga Hore) ayaa waxbarasho hore oo bilaash ah, tayo sare leh iyo nafaqo dhammaystiran, adeegyo caafimaad, caafimaadka maskaxda, waxbarashada waalidka/daryeelaha, iyo taageerada dhalmada kahor siiya shakhsiyadka iyo qoysaska leh carruurta dad'doodu u dhexayso dhalasho ilaa 5 sano iir.

wac
1-855-797-4357

MaineCare

MaineCare waa barnaamijka Medicaid ee Maine waxaana uu siiyaa caymis caafimaad oo lacag la'aan ah ama qiimo jaban dadka waaweyn, carruurta, haweenka uurka leh, waayeelada, iyo dadka naafada ah dakhligoodu hooseeyo. MaineCare waxay kaa caawinaysaa inaad hesho daryeelka caafimaad ee aad u baahan tahay si aad u daryeesho naftaada ama qoyskaaga. Macluumaad dheeraad ah ayaa heli kartaa waxaadna codsan kartaa MaineCare adigoo booqanaya MyMaineConnection.gov.



ama wac
207-642-7991

CoverME

Caymiska Caafimaadka ee Maine (CoverME.gov) ayaa bixinaysa xog ku saabsan dookhyada caymiska caafimaadka ee bilaashka ah ama kharashka yar ee qoysaska Maine. Waxaad sidoo kale helayaa macluumaadka ururada maxaliga ah ee kaa caawin kara fahanka dookhyadaada caymiska iyo buuxinta codsiga.



ama wac
1-833-714-7969

Help Me Grow Maine (Iga Caawi Horumarinta Maine)

Help Me Grow Maine waa bar-kulan loo asteeyay qoysaska haysta carruurta da'doodu u dhexayso dhalasho ilaa 8 sano jir, iyo sidoo kale daryeeyaasha uurka leh, inay ku xidhmaan macluumaadka iyo adeegyada la xiriira korriinka ilmaha iyo sidoo kale dhigaalada bulshada. Iyadoo lala kaashanayo 211 Maine, daryeeyaasha iyo adeeg-bixiyayaasha ayaa la xariiri kara Help Me Grow si ay u helaan taageero dheeraad ah. Help Me Grow ayaa dhageysan doonta, ku xiri doonta qoysaska adeegyada, oo samayn doonta dabagalka daryeeyaasha iyo dadka gudbinta sameeya.



Qoysaska Maine

Maine Families waa shabakad gobalka oo dhan ka kooban oo ay ku jiraan kooxaha bulsheed ee wax ka qabta baahiyaha haweenka uurka leh iyo waalidiinta dhawaan ilmaha dhalay. Booqdayaasha daryeelida iyo xirfada ee guriga ayaa kaala shaqayn doona helitaanka xogta iyo ilaha kaa taageeraaya caafimaadka jirka iyo dareenka ee ilmahaaga iyo qoyska dhan.



Faragelinta Hore ee ME, 0-3 sano jir & Waxbarashada Lacag La'aanta ah ee Habboon, 3-5 sano jir

ama wac
877-770-8883

Si lacag la'aan ah oo isxilqaam ah, laga bilaabo da'da dhalashada waxay Waaxda Waxbarashada Maine (Maine's Department of Education) bixinaysaa barnaamijyada korriinka caafimaadka leh iyo waxbarashada. Farogelinta Hore ee ME, da'da dhalashada ilaa saddex sano jir, waxay bixinaysaa qiimeynta korriinta ee qoyska loo gaar yeelo, taageero waxbarasho iyo agabyo kale. Carruurta yaryar, oo ay da'doodu tahay saddex ilaa shan sano jir, waxay ka faa'iidaystaan waxbarashada dadweynaha ee ku habboon ee lacag la'aanta ah iyo adeegyada korriinka lala xiriiriyo (Child Development Services, Part B).



Qorshaha Daryeelka Badqabka (POSC)

Maine's Plan of Safe Care (Qorshaha Daryeelka Badqabka ee Maine) ayaa lagu abuuray iskaashi u dhexeeya bixiyaha daryeelka caafimaadka ama adeegyada bulshada, hooyada iyo/ama daryeeyaasha kale, iyadoo la aqoonsanaayo awoodaha iyo baahiyaha qoyska, ilaha faa'iidadada leh iyo tallaabooyinka la qaadi karo si qaabka ugu habboon loogu taageero dhallaanka iyo qoysaska u-baylah noqday maandooriyaasha. Qorshaha Daryeelka Badqabka waxaa badanaa ku jira adeegyada gudbinta ama siinta xogta xariirka qoysaska si ay ayagu u raadraacaan.



Children and Youth with Special Health Care Needs (Carruurta iyo Dhallinyarada leh Baahiyaha Daryeel Caafimaad ee Gaarka ah)

ama wac
1-800-698-3624

Children and Youth with Special Health Care Needs (Carruurta iyo Dhallinyarada leh Baahiyaha Daryeel Caafimaad ee Gaarka ah) waxay la shaqaysaa qoysaska haysta carruurta qabta baahiyaha gaarka ah ee daryeelka caafimaadka oo ay da'doodu ka yar tahay 22 sano jir. CYSHCN ayaa ku hagi karta qoysaska iyo ururrada inay helaan khayraadka buuxin kara baahiyaha ilmahooda. Shaqaalaha ayaa ku hagi kara qoysaska nidaamyada balaaran ee caafimaadka, ayagoo ku xiraaya daryeelka gaarsiinaaya natijada ugu wanaagsan ee bukaanka.



Early Childhood Consultation Partnership (Iskaashiga Talo-bixinta Carruurnimada Hore)

ama wac
207-624-7991

La-taliyayaasha ECCP waxay si wadajir ah ula shaqeeyaan qoysaska, bixiyayaasha daryeelka ilmaha, iyo macallimiinta si ay uga taageeraan baahiyaha caafimaadka maskaxda ee carruurta da'doodu u dhexayso 0-8 sano jir kuwaasi oo qaba dhibaatooyin dhanka habdhaqanka ma shucuurta ah ee jooga xannaanada ama dugsi. Adeegyada ECCP waa kuwo muddo gaaban, tabarucaad ah, oo lacag la'aan ah.

Si aad u iskaan garayso koodhadhka QR, fur app-ka kaamarada aaladaada oo ku toosi koodhka aad rabto inaad iskaan garayso. Gujoraac ayaa shaashada ka soo muuqan doona — guji si aad u tagto mareegta.

